

RUGTA CAAFIMAADKA EE DIAMONDHEAD OGGOLAANSHAHA DARYEELKA CAAFIMAADKA

Carruurta iyo dhalinyarada, laga bilaabo dhalashada illaa ka qalinjabinta dugsiya sare, oo ku nool, ka shaqeeya ama dugsiya ka dhigtaan Dugsiya Degmada Burnsville–Eagan–Savage, ayaa u qalma inay ka helaan daryeel caafimaad oo bilaash ah Rugta Caafimaadka ee Diamondhead. Si ay u helaan adeegyada caafimaadka ee hoos ku qoran, waa inaad buuxisaa foomkan oggolaanshaha oo aad ku soo celiso Rugta Caafimaadka ee Diamondhead.

Waxaan bixinayaa oggolaanshaha in ilmahaygu isticmaalo adeegyada caafimaadka ee Rugta Caafimaadka ee Diamondhead.

Magaca ilmaha: _____ **Taariikhda dhalashada:** _____

Waxaan u oggolaanayaa ilmahayga inuu helo **DHAMMAAN*** Adeegyada rugta caafimaadka, oo ay ku jiraan kuwa soo socda:

- **Daryeelka joogtada ah:** Daaweynta cuduradda yar yar sida hargabka, ifilada, caabuqyada, madax-xanuunka, dhego xanuunka, dhuun xanuunka, murgacasho, sarmada, gubashada, dhibaatooyinka maqaarka, calool xanuunka iyo dhabar xanuunka; baaritaanada jirka ee cayaaraha; baaritaanada aragga iyo maqalka; iyo talaalada
- **Barashada caafimaadka:** Maareynta miisaanka, la-talinta cuntada gaarka ah, ka-hortaga sigaarka, iyo kor u qaadista badqabka
- **Adeegyada shaybaarka:** Baaritaanada joogtada ah ee dhiiga iyo kaadida, baaritaanka dhuunta, iyo baaritaanada sonkorowga
- **La-talinta:** Ka caawinta la tacaalida walaaca, walwalka, niyadjabka, xadgudubka iyo dayacaada, caafimaadka maskaxda, horumarinta isku kalsoonaanta, iyo kahortaga is-dilka

*** MUHIIM AH:** Haddii ay jiraan adeeyo kor ku qoran aadan rabin in ilmahaagu helo, fadlan iskutallaab saar. Isaga ama iyadu wuxuu/waxay heli doonaa/doontaa oo keliya adeegyada ku hara liiska. Fadlan ka war qab in Sharciga Minnesota u oggolahay ilmahaagu in laga daaweeyo, iyada oo aan lagaa haysan fasax ama oggolaansho, cudurada galmada lagu kala qaado, ku-tiirsanaanta kiimikada, iyo uurka iyo xaaladaha la xiriira uurka, oo ay ka mid tahay ka-hortagga uurka.

Xasaasiyadaha

Ilmahaygu wuxuu leeyahay xasaasiyadaha soo socda: _____

Dawooyinka

Ilmahaygu wuxuu qaataa dawooyinka soo socda: _____

Ma leedahay caymiska caafimaadka?

HAA _____ MAYA _____

Waxan kuu weydiineynaa macluumaadkan kaliya si ay ula socdaan barnaamijka Tallaalka Caruurta ee Minnesota. Booqashooyinka caafimaadka Rugta Caafimaadka ee Diamondhead waa bilaash oo caymiskaaga laguma dallacayo.

Saxiixa: _____

(Waalidka ama Mas'uulka)

Taariikhda: _____

Xiriirka kaala dhaxeeyo ardayga: _____

Telefoon maalmeedka: _____

Foomkan oggolaanshaha wuxuu ku jiri doonaa faylka rugta caafimaadka wuxuuna ansax yahay hal sanad waxbarasheed. Oggolaansho qoraal ah ayaa loo baahan yahay sannad kasta.

Fadlan u soo celi foomka saxiixan _____